Siyaasadda Dallicidda Baaqiga Bukaanku Bixinayo iyo Uruurinta Daynta

Siyaasaddani waxa ay Ku Saabsan Tahay goobaha soo socda:
Big Rapids (Mecosta County Medical Center), Continuing Care, Corporate, Gerber (Newaygo County General Hospital Association), Ludington (Memorial Medical Center of West Michigan), Outpatient/Physician Practices, Pennock (Pennock Hospital), Reed City (Reed City Hospital Corporation), SH GR Hospitals (Spectrum Health Hospitals), SHMG, Spectrum Health Lakeland (Lakeland Community Hospital Watervliet; Lakeland Hospitals at Niles and St. Joseph Inc.), United/Kelsey (Spectrum Health United; Spectrum Health Kelsey Hospital), Zeeland (Zeeland Community Hospital)

Khusayntu Waxay Ku Xadidan Tahay:	Munaasab Kuma Aha
Lambarka Tixraaca:	13636
Lambarka Raaca:	4
Taariikhda Dhaqan Galka:	02/01/2021
Aaga Shaqada:	Wareega Maaliyadda, Dakhliga
Waaxda Aaga:	Xafiiska Kharash Dalicida Shirkada (Corporate Billing Office, CBO), Maaliyada, Heitaanka Bukaanka, Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka (Patient Financial Services, PFS)

Ogeysiinta Takoor La'aanta: Spectrum Health waxay u hogaansanaataa sharciyada xuquuqda madaniga Federaalka ee quseeya oo kuma takoorto dadka si ku saleysan qowmiyada, midabka, waddanka qofku ka soo jeedo, da'da, curyaannimada, ama jinsiga. Spectrum Health Ma ka saarto dadka ama ula ma dhaqanto is ka duwan sababo la xiriira qowmiyada, midabka, waddanka qofku ka soo jeedo, da'da ama jinsiga. Eeg Lifaaqa A wargelinta dhamaystiran ee bilaa takoorka iyo sidoo kale helitaanka kaalmada luuqada.

1. Ujeedada

1.1. In la xaqiijiyo cadaalada iyo in si isku mid ah loola dhaqmo dhamaan Bukaanada Baaqiga Uu Bixinayo Bukaanka ay ku leeyihiin Spectrum Health ama cida kale ee hoos timaada ("Spectrum Health"). Sidaas darteed, Spectrum Health ma qaadi doonto talaabo ay ku doonanayso hay'ada banaanka ah oo kasoo qaada lacagta daryeelkii la siiyay shakhsiga kahor inta aan la samaynin dadaal macquul ah oo lagu ogaanayo hadii shakhsiga uu u qalmo kaalmo taas oo hoos timaada Siyaasada U Qalanka Kaalmada Dhaqaale.

2. Qeexdimo

2.1. La Daahidda: Baaqiga Bukaanku Bixinayo ee la isku dayay in laga qaado markii Spectrum Health ama cidda ay wakiilatay ee kale aan la bixin iyada oo dhamaystiran ama aanay jirin qaab lagu heshiiyay oo qorshe bixineed kadib markii laga qiil waayay in lagu dhameeyo Spectrum Health ama cidda ay u wakiilatay gudaheeda.

2.2. Talaabooyinka Dayn Uruurinta Banaanka (Extraordinary Collection Actions, "ECA"): Talaabooyinkan waxaa kamid ah bilaabida talaabo madani ah, ka jarida mushaharka bukaanka.

2.3. Damiin: Shakhsi u damaanad qaadaya lacagta adeegyada uu Bukaanku ka heley Spectrum Health.

2.4. Bukaanka: Shakhsiga ka heley adeegyada Spectrum Health ama cidda hoos timaada (“Spectrum Health”).

2.5. Baaqiga Bukaanku Ka Masuulka Yahay: Wixii baaqi ah ee bukaanka iyo/ama cidda ka damiinka ah laga doonayo ee lacag ah. Waxaa taas kamid ah baaqiga aanay caymisku bixinayn, caymis wadareed, wixii laga jarayo, wada bixin, adeegyada aanu caymisku kharashkooda bixin, iyo wixii baaqi ah ee marka caymisku bixiyo kharashka soo hadha ee loo arko inuu bukaanka/damiinku ka masuul yahay.

2.6. Qandaraasle Kale oo Daynta Soo Uruuriya: Shirkad lagula jiro heshiis oo Baaqiga Bukaanku Ka Masuulka Yahay ee uu Aanu Bixin soo qaadaysa iyada oo matalaysa Spectrum Health laakiin waxa ay kusoo uruurinaysaa dayntaas magaceeda iyada oo raacaysa shuruucda iyo xeerarka Federalka, Gobolka iyo deegaanka.

3. Masuuliyadaha

3.1. Siyaasadda Dallicidda Baaqiga Bukaanku Bixinayo iyo Uruurinta Daynta waxaa maamuli doona cidda ku haboon ee ay u igmatay Spectrum Health sida uu dhigayo nidaamka la xidhiidhaayi.

4. Ku dhaqan

4.1. Ku xad gudubka siyaasada ee wixii shaqaale Spectrum Health ah waxaa ka dhalan kara talaabo anshax marin.

5. Siyaasadda

5.1. Spectrum Health waxay la shaqayn doontaa Bukaanada iyo/ama Damiinada iyo ciddii kale ee awood u leh sidii loo go'aamin lahaa ee xalka haboon looga gaadhi lahaa Baaqiga Bukaanku Bixinayo. Baaqiga Bukaanku Bixinayo waxaa lagu xalin doonaa sida ay dhigayso Siyaasaddani.

5.1.1. Bukaanada Dhinta - Inay naxariis u muujiso qoyska Bukaanka dhintay inta ay murugaysan yihiin waxaa weeye mudnaanta kowaad ee Spectrum Health. Spectrum Health waxay u sheegi doontaa oo ay u xalin doonaan Baaqida Bukaanka dhintay Bixinayo sida ku cad Nidaamka Baaqiga Bukaanka Dhintay Bixinayo ama Damiinka. Sida uu dhigayo nidaamkani Spectrum Health waxay isticmaali doontaa duwaanka shacabka si ay u cadayso taariikhda dhimashada, u qiimayso u qalanka kaalmada dhaqaale, Medicaid, oo waxay qiimayn doontaa inay dalbato hantida qofka dhintay.

5.1.2. Bukaanada Kacay (busaaradsaday) - Spectrum Health waxay u hogaansantaa Xeerka Kicitaanka Maraykanka. Sidaa darteed, Spectrum Health waxay sheegi doontaa oo ay u xalin doontaa Baaqiga Bukaanka kacay Bixinayo sida lagu sheegey Nidaamka Baaqiga Bukaanka Kacay Bixinayo. Hawsha uruurinta iyo kharash ku dalicida ayaa joogsan doonta wakhtiga wargelinta kicitaanka ee dhamaan taariikhaha adeegyadu ay soo wada hoos galaan xaraynta kicitaanka. Spectrum Health ayaa la socon doonta dacwada kicitaanka ilaa inta lasoo gabo gabaynayo ama meesha laga saarayo xaraynta dacwada kicitaanka.

5.1.3. Bukaanada u Baahan Kaalmada Dhaqaale - Spectrum Health waxay leedahay ikhtiyaaro kaalmo dhaqaale oo ay heli karaan Bukaanada Baaqiga Bukaanku Bixinayo taas oo ku salaysan Siyaasada U Qalanka Kaalmada Dhaqaale.

5.1.3.1. Bukaanada iyo/ama Damiinada waxaa loo sheegi doonaa Siyaasada Kaalmada Dhaqaale iyada oo qoraal ah sida lagu sheegey nidaamyada la xidhiidha. Spectrum Health waxay aqbashaa arjiyada kaalmada dhaqaale ee xisaabaadka inta lagu jiro dhamaan dadaalada uruurinta gudaha iyo marka loo gudbinayo Qandaraaslaha Uruurinta Daynta ee Kale mudo ugu yaraan laba boqol iyo afartan (240) maalmood ah oo ka bilaabanta taariikhda bayaanka kharashka ka bixitaanka kadib ("Mudada Arjiga").

5.1.3.1.1. Soo Gudbinta Arjiga Kaalmada Dhaqaale oo Dhamaystiran.

- Hadii Bukaanka ama Damiinka uu gudbiyo arjiga kaalmada dhaqaale oo dhamaystiran inta lagu jiro Mudada Arjiga, Spectrum Health waxay:
    - Joojin doontaa wixii ECAs ah
    - Waxay samayn go'aamin u qalan hadii uu Bukaanku u qalmo kaalmo dhaqaale oo waxa ay wargelin doontaa Bukaanka iyo/ama Damiinka iyada oo qoraal ah wixii kasoo baxa go'aaminta u qalanka (oo ay ku jirto, hadii ay ku haboon tahay, kaalmada uu Bukaanku u qalmo) iyo waxa looga duulay markii la go'aaminayay.
    - Hadii Bukaanka la ogaado inuu u qalmo kaalmada dhaqaale ee daryeelka, Spectrum Health waxay:
        - Siin doontaa Bukaanka iyo/ama Damiinka wargelin qoraal ah oo loogu sheegayo masuuliyadda dhaqaale ee Bukaanka iyo/ama Damiinka sida ay dhigayso Siyaasada U Qalanka Kaalmada Dhaqaale;
        - Dib ugu gudida shakhsiga wixii lacag ah ee uu bixiyay ee daryeelka ee ka badan xadiga isaga la go'aamiyey inuu ka masuul yahay bixinteeda sida ay dhigayso Siyaasada U Qalanka Kaalmada Dhaqaale, iyada oo ka yar $5 moojee (ama ah xadi kale oo lagu sheegey Qodobada Dakhliga Gudaha);
        - Waxa ay qaadaa dhamaan talaabooyinka la gudboon ee ay kaga hortagi karto inay ka qaado ECA Bukaanka iyo/ama Damiinka si ay uga hesho lacagta daryeelka.

5.1.3.1.2. Soo Gudbinta Arjiga Kaalmada Dhaqaale ee Aan Dhamaystirnayn.

- Hadii shakhsigu uu gudbiyo arjiga kaalmada dhaqaale oo aan dhamaystirnayn inta lagu jiro Mudada Arjiga, Spectrum Health waxay:
    - Joojinaysaa wixii ECAs ah ee ay ku heleyso kharashka daryeelka;
    - Waxay siisaa shakhsiga wargelin qoraal ah oo loogu sharaxayo macluumaadka dheeraadka ah iyo/ama waraaqaha looga baahan yahay sida ay dhigayso Siyaasadda U Qalanka Kaalmada Dhaqaale ama foomka arjiga kaalmada dhaqaale ee ay tahay in lasoo gudbiyo si loo dhamaystiro arjiga iyo in macluumaadka noocaas ah iyo/ama waraaqaha ay tahay in lagu helo sodon (30) maalmood oo ka bilaabma taariikhda wargelinta qoraalka ah ama arjiga waa la diidi doonaa oo hawsha uruurinta daynta ayaa bilaabmi doonta.
        - Wargelintaas waxaa kamid ah macluumaadka xidhiidhka Spectrum Health.
    - Hadii macluumaad iyo/ama waraaqo dheeraad ah la helo oo xisaabtu ay tahay Mudada Arjiga gudaheeda, xisaabta ayaa mar kale loo eegi doonaa kaalmada dhaqaale oo hawsha uruurinta daynta ayaa la joojin doonaa ilaa inta la gaadhayo go'aanka.

5.1.3.1.3. Soo Gudbin Waayida Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha.

- Marka aan wax arji kaalme dhaqaale aan lasoo gudbin inta lagu jiro Mudada Arjiga, Spectrum Health waxay markaa bilaabi kartaa ECAs si ay u hesho lacagteeda daryeelka marka ay ku wargeliso shakhsiga Siyaasadda U Qalanka Kaalmada Dhaqaale sida lagu sharaxay halkan.

5.1.4. U Habaynta Bukaanada Aan Caymiska Lahayn - Iyada oo aan laga hor imanaynin siyaasadan, adeegyada isbitaalka ee la siiyay Bukaanada aan lahayn caymiska ee dakhligoodu sanadkii uu ka hooseeyo ama uu le'eg yahay 250% Tilmaamaha Saboolnimada Federalka (Federal Poverty Guidelines, FPG) ee sida kale aan u buuxinaynin Siyaasadda U Qalanka Kaalmada Dhaqaale, Spectrum Health waa inay markaa kharashka ugu habaysaa adeegyadaas wax aan ka badnayn 115% xadiga Medicare ee adeegyada lamidka ah. Bixinta kharashka la habeeyay waxaa loo arki inay tahay kharashka adeegyada oo dhamaystiran in la bixiyey.

5.1.5. Ikhtiyaarada Bixinta - Spectrum Health waxay qeexi doontaa oo ay siin doontaa ikhtiyaaro bixinta lacagta ah Bukaanka iyo/ama Damiinka leh Baaqiga Bukaanku Bixinayo si ay ugu suurto gasho in Bukaanka iyo/ama Damiinka uu maareeyo baaqiga lagu leeyahay sida ku cad Nidaamka Ikhtiyaarada Bixinta Baaqiga Bukaanku Bixinayo. Ikhtiyaarada waxaa kamid ah lacagta oo dhamaystiran, qiime dhimista dhakhso u bixinta, iyo qorshayaasha kordhinta bixinta lacagta.

5.1.6. Uruurinta daynta - Hadii Baaqiga Bukaanku Bixinayo aan weli la bixin kadib markii dhamaan ikhtiyaarada lagu sheegey 5.1.1-5.1.5 ee sare laga qiil waayo, Spectrum Health waxay markaa u gudbin kartaa Baaqiga Bukaanku Bixinayo ee aan la bixin Qadaraaslaha Uruurinta Daynta sida ku cad Nidaamka Dallicidda Baaqiga Bukaanku Bixinayo iyo Uruurinta Daynta. Ugu yaraan sadex (3) warbixinood oo bixinta lacagta lagu dalbanayo ayaa loo dirayaa bukaanka iyo/ama damiinka kahor inta aan gudbinta la samaynin.

5.1.6.1. Spectrum Health ma aqbali doonto in wax ECA ah uu dhaco sodonka (30) maalmood ee ugu horeeya marka loo gudbiyo Qandaraaslaha Uruurinta Daynta.

5.1.6.2. Spectrum Health kuma qaadi doonto ECA Bukaanka iyo/ama Damiinka iyada oo aan marka hore la samaynin dadaal macquul ah oo lagu go'aaminayo u qalanka bukaanka ee Siyaasadda U Qalanka Kaalmada Dhaqaale. Gaar ahaan, hadii Spectrum Health ay doonayso inay qaado ECAs, waxaa dhici doona waxyaabaha soo socda ugu yaraan sodonka (30) ee ugu horeeya marka la bilaabayo mid ama wax ka badan oo ECA ah:

- Spectrum Health waxay ku wargelin doontaa Bukaanka iyo/ama Damiinka qoraal ahaan wixii kaalmo dhaqaale ee ay heli karaan shakhsiyaadka u qalma oo waxaana lagu sheegi doonaa ECAs Spectrum Health (ama Qanadaraaslaheeda Uruurinta Daynta) ay doonayso inay bilawdo sidii ay u heli lahayd lacagteeda.
- Spectrum Health waxa ay samayn doontaa dadaal macquul ah oo ay af ahaan ugu wargelinayso bukaanka Siyaasadda U Qalanka Kaalmada Dhaqaale iyo sida Bukaanka iyo/ama Damiinku u heli karo kaalmada nidaamkan arjiga.

5.1.7. Kusoo Celinta Boosta - Kusoo celinta boosta ayaa laga hawlgalaa iyadoo la adeegsanayo kaydka macluumaadka USPS oo waxaa loo saxaa sida ku haboon. Waxaa iska leh damiinka masuuliyada inuu bixiyo cinwaankiisa boosta wakhtigan wakhtiga diritaanka ama marka uu guuro. Hadii xisaabtu ayna lahayn cinwaan sax ah, Spectrum Health waxay u aragtaa in dadaal macquul ah ay tahay in la sameeyo.

6. **Dib u eegista**
Spectrum Health waxay xaq u leedahay badalka, wax ka badalka ama dib u qaabaynta ama meesha ka saaridda siyaasaddan wakhti kasta iyada oo aan qoraal hore oo wargelin ah bixin.

7. **Ogolaanshaha Ugu Danbeeya**
Ogolaanshaha ugu danbeeya ee lagu go'aaminayo in Spectrum Health ay samaysay dadaal macquul ah oo lagu go'aaminayo hadii Bukaanku uu u qalmo kaalmada dhaqaale sida ku cad Siyaasadda U Qalanka Kaalmada Dhaqaale oo ay markaa bilaabi karto ECAs oo ka dhan ah Bukaanka iyo/ama Damiinka waxaa iska leh Madaxweyne Ku Xigeenka Sare, Wareega Dakhliga ama cidda uu u wakiisho.

8. **Tixraacyada**
Siyaasadda U Qalanka Kaalmada Dhaqaale
Nidaamka Baaqiga Bukaanku Bixinayo ee Bukaanka ama Damiinka Dhinta
Nidaamka Baaqiga Bukaanku Bixinayo ee Bukaanka Kaca
Nidaamka Ikhtiyaarada Bixinta Baaqiga Bukaanku Bixinayo

9. **Samaynta iyo Ansixinta Siyaasadda**

Mulkiilha Waraaqaha:
Mary Jo Klobucher (Kaaliyaha Maamulka)

Qoraa(yo) (hore u ahaa Qoraaga)**:**
Crystal Lang (Maamule, Xafiiska Kharash Bixinta Shirkada)

Naqdiye(yaal):
Amy Assenmacher (SVP, Wareega Dakhliga Maaliyadeed), Courtney Guernsey (Dir Sr, Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka), Matthew Cox (SVP, Sarkaal Maaliyad oo Sare), Sarah Clark (Dir Sr, Lataliye Duwaanka & Maaliyada), Steffany Dunker (Lataliye Maamul)

Ansixiye:
Christina Freese Decker (Madaxweyne & CEO)

Ogeysiinta Takoor La'aanta:

Spectrum Health waxay u hogaansanaataa sharciyada xuquuqda madaniga Federaalka ee quseeya oo kuma takoorto dadka si ku saleysan qowmiyada, midabka, waddanka qofku ka soo jeedo, da'da, curyaannimada, ama jinsiga. Spectrum Health Ma ka saarto dadka ama ula ma dhaqanto is ka duwan sababo la xiriira qowmiyada, midabka, waddanka qofku ka soo jeedo, da'da ama jinsiga.

Spectrum Health:

- Waxay siiyaan dadka naafada ah gargaar iyo adeegyo lacag la'aan ah si ay nagula soo xiriiran si waxtar leh, sida:
  - Turjumaano aqoon u leh luuqada dhagoolada
  - Macluumaad qoraal oo qaabab kale ah (far waaweyn, cod, qaabab elektrooniga oo la heli karo, qaabab kale)
- Siisaa adeegyada luuqada oo bilaash ah dadka luuqadooda koowaad aanay Ingiriis aheyn, sida:
  - Turjumaano aqoon u leh
  - Macluumaad ku qoran luuqado kale

Hadii aad u baahan tahay adeegyadan, kala xidhiidha Adeegyada Luuqada Spectrum Health: 616.267.9701 ama 1.844.359.1607 (TTY:711)

Haddii aad aaminsantahay in ay Spectrum Health ku guuldareystay in lagu siiyo adeegyadaan ama laguu takooray qaabab kale oo ku saleysan qowmiyada, midabka, waddanka aad ka soo jeeddo, da'da, curyaannimo, ama jinsiga waxaad ku gudbin kartaa cabasho:

Director, Patient Experience
100 Michigan St NE, MC 006
Grand Rapids, MI 49503
616-391-2624; taleefan bilaash ah: 1-855-613-2262
patient.relations@spectrumhealth.org

Waxaad gudbin kartaa cabasho fool ka fool ama boosta, fakis, ama i-meel ah. Hadii aad u baahan tahay caawimo xaraynta cabasho, Agaasimaha Xidhiidhka Bukaanka ayaa kuu diyaar ah oo ku caawin kara.

Waxaad sidoo kale ugu gudbinta kartaa cabashada xuquuqda rayidka Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maraykanka, Xafiiska Xuquuqda Rayidka elektrooniga ahaan ilaa Xafiiska Bogga Cabashada Xuquuqda Rayidka, oo laga heli karo https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf, ama i-meel ama taleefan ahaan:

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maraykanka
200 Independence Avenue SW, Room 509F, HHH Building
Washington, DC 20201
1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD).

Foomamka cabashada waxaa laga heli karaa http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.

Contact Us

Español *(Spanish)*
ATENCIÓN: Si usted habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 1-844-359-1607 (TTY: 711).

العربية (*Arabic*)
ملحوظة: إذا كنت تتحدث اذكر اللغة، فإن خدمات المساعدة اللغوية تتوافر لك بالمجان. اتصل برقم 1-844-359-1607.(رقم هاتف الصم والبكم: 711).

中文 (*Chinese*): 國語/普通話 (*Mandarin*), 粵語 (*Cantonese*)
請注意：如果您講中文，你可以獲得免費的語言輔助服務。請撥打1-844-359-1607（TTY 手語翻譯：711）。

Tiếng Việt (*Vietnamese*)
CHÚ Ý: Nếu bạn nói Tiếng Việt, có các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí dành cho bạn. Gọi số 1-844-359-1607 (TTY: 711).

Ako govorite srpsko *(Serbian, Croatian or Bosnian)*
OBAVJEŠTENJE: Ako govorite srpsko-hrvatski, usluge jezičke pomoći dostupne su vam besplatno. Nazovite 1-844-359-1607 (TTY: 711). (TTY- Telefon za osobe sa oštećenim govorom ili sluhom: 711).

አማርኛ (*Amharic)*
ማስታወሻ: የሚናገሩት ቋንቋ አማርኛ ከሆነ የትርጉም እርዳታ ድርጅቶች፣ በነጻ ሊያግዝዎት ተዘጋጀተዋል፡ ወደ ሚከተለው ቁጥር ይደውሉ 1-844-359-1607. (መስማት ለተሳናቸው: (TTY: 711).

नेपाली (*Nepali*)
ध्यान दिनुहोस्: तपाईंले नेपाली बोल्नुहुन्छ भने तपाईंको निम्ति भाषा सहायता सेवाहरू निःशुल्क रूपमा उपलब्ध छ । फोन गर्नुहोस् 1-844-359-1607 (टिटिवाइ: (TTY: 711).

Thuɔŋjaŋ (*Nilotic – Dinka*)
PIƆ KENE: Na ye jam në Thuɔŋjaŋ, ke kuɔny yenë kɔc waar thook atö kuka lëu yök abac ke cïn wënh cuatë piny. Yuɔpë 1-844-359-1607 (TTY: 711).

Kiswahili (*Swahili*)
KUMBUKA: Ikiwa unazungumza Kiswahili, unaweza kupata huduma za lugha bila malipo. Piga simu 1-844-359-1607 (TTY: 711).

فارسی (Farsi)
توجه: اگر به زبان فارسی گفتگو می کنید، تسهیلات زبانی بصورت رایگان برای شما فراهم می باشد. با 1.844-359-1607 (TTY: 711) تماس بگیرید.

Français (*French*)
ATTENTION: Si vous parlez français, des services d'aide linguistique-vous sont proposés gratuitement. Appelez le 1.844-359-1607 (TTY: 711).

(*Burmese*)
အသိပေးခြင်း

သင်ပြောသော ဘာသာစကားကို အခမဲ့ ဘာသာပြန်
ရှိပါသည်။ ဖုန်းခေါ်ရန်

فارسی دری (***Dari***)
توجه اگر به زبان دری صحبت می کنید، خدمات کمک زبانی بصورت رایگان برای شما در دسترس است. تماس با
. (TTY: 711) 1-844-359-1607

Kreyòl Ayisyen (*Haitian Creole*)
ATANSYON: Si ou pale Kreyòl Ayisyen, gen èd nan lang ki disponib gratis pou ou. Rele nimewo 1-844-359-1607 (TTY: 711).

Ikinyarwanda (*Kinyarwanda*)
ICYITONDERWA: Niba uvuga ikinyarwanda, serivisi z'ubufasha ku byerekeye ururimi, urazihabwa, ku buntu. Hamagara 1-844-359-1607 (ABAFITE UBUMUGA BW'AMATWI BIFASHISHA ICYUMA CYANDIKA -TTY: 711).

Soomaali (***Somali***)
FIIRO GAAR AH: Haddii aad ku hadasho Soomaali, adeegyada caawimada luqadda, oo bilaasha, ayaad heli kartaa. Wac 1.844-359-1607 (TTY: 711).

اللهجة السودانية (***Sudanese***)
انتباه: إذا كنت تتحدّث اللهجة السودانية، خدمات المساعدة بلغتك متاحة مجاناً. اتصل على الأرقام
1-844-359-1607 (رقم الصم والبكم: 711).

தமிழ் (*Tamil*)
தமிழ் (Tamil) கவனம்: நீங்கள் தமிழ் பேசினால், உங்களுக்கு இலவச மொழி உதவி சேவைகள் கிடைக்கும். இந்த எண்ணை அழைக்கவும்: 1-844-359-1607 (TTY: 711).

ትግርኛ (***Tigrinya***)
ትኹረት: ትግርኛ እንድሕር ትዛረብ ኮንካ፣ ናይ ቋንቋ ደገፍ ኣልግሎታት፣ ብናጻ ክቐርቡልካ እዮም። ደውል 1.844-359-1607 (TTY: 711)።